# Bayaanka Xuquuqda Deeganayasha

GURIGA KALKAALISOOYINKA IYO DEEGANAYAASHA DARYEELKA GURIGA EE MINNESOTA

## Ujeedka Sharci-Dajiyaasha

Ujeedada Sharci Dejinta iyo ujeedada qoraalkan waa danta iyo horumarinta fayo-qabka dadka degan guryaha waayeelka iyo guryayaha daryeelka[1]. Guryaha waayeelka iyo kuwa daryeelka midkoodna kuma qasbi karaan in ey ka tanasulaan xuquuqdaan iyada oo looga dhigaayo shuruud soo galitaanka xarunta. Masuul kasta ama ilaaliyaha deeganka, ama ka maqnaashaha masuulka ama ilaaliyaha, qof walba oo daneenaayo wuxuu raadsan karaa fulinta isaga oo wakiiil ka ah daganaha. Qofkii daneenaayo in uu sido kale waxa uu ka raadsa in karaa fulinta xuquuqda daganaha u wakiilka ka yahay isaga oo u maraayo hey'adaha maamulka ama maxkamada deegaanka in awood u siyaan ilaalinta iyo ka daryeelida. Ilaa la sugayo natiijada qaabsocodka dhaqangalinta guriga xanaanada ama daryeelka hoy laga yaabaa in u iimaanka wanaagsan, u hoggaansamo tilmaamaha ilaaliyaha ama waliga. Waa ahmiyadda sharcigaan in xoriyada dadka degan kasta ee rayidka ah iyo diinta, oo ay ku jiraan xaq uu u leeyahay in go'aamada shaqsiyadeed iyo ogaashada doorashada aad heli kartid, in aan la jebin doonin, oo in guriga xanaanada ama daryeelka hoyga ah dhirrigelinaya, isla markaasna gacan ka siiyaan ku dhaqmidada xuquuqdooda si dhameystiran oo macquul gal ah.

## Qeexitaanno

Waa Ujeedada qoraalkan, ''daganaha'' macnaheedu waa qofka la dhigey xarunta daryeelka aan halis aheyn oo ay ku jiraan goobaha laga fidiyiyo daryeelka, guryaha kalkaalisooyinka, guryaha daryeelka iyo hoyga daryeelka loo baahan yahay, sabab la xiriirta jiro maskaxeed ama jireed oo in badan heysay ama naafanimo, ama ka kabsanaya dhaawac ama cudur, ama da'da oo sii wenaaneyso (waayeelnimo).

## Baaqa Sharciyada Dadweynaha

Waxaa la sheegay in ay sharciyaada guud ee gobolkaan in danta deegane kasta laga ilaaliyo ku dhawaaqidda bayaanka xuquuqda oo ka mid ah, laakiin aan ku xaddidneyn xuquuqda ku cad bayaankan.

---

[1] Dakoomingtigan, ereyga, "guriga" waxa oo tilmaamaya guryaha kalkaalisooyinka ee la isku daryeelo.

# Warbixin ku Saabsan Xuquuqda

Deeganayaasha, marka loo ogolaado, waa in looo sheego in ay jiraan xuquuq sharciyeed oo ilaalineyso inta ay joogaan guriga xanaanada ama daryeelka hoyga ah ay dabcan daaweynta iyo dayactirka oo dhan ee bulshada iyo in lagu qeexay qoraal la socda qoraalka ah ee xuquuqda ay khuseyso iyo waajibaadka ku xusan qaybtan. Diya fadin macquul ah waa in loo sameeyaa dadka qaba naafada ka ah xaga wada xiriirka iyo kuwa ku hadla luqad aan ahayn Ingiriisi. Siyaasadaha hadda xarunta, natiijooyinka baaritaanada maamulka caafimaadka gobolka iyo degmada, iyo sharaxaad dheeraad ah ee bayaanka qoraalka ah ee xuquuqda waa in la siiyaa dadka degaanka, masuulkooda ama si macquul ah in maamulaha ama qof kale oo shaqaalaha loo qoondeeyey wakiiladoodana doortay, oo waafaqsan Xeerarka Minnesota cutubka 13, Xeerka Niidaamka Macluumadka, qeybtisa 626.557, la xiriirta dadka waaweeyn ee dayacan.

# La-Macaamilka Edboon

Deeganayaasha waxey xaq u leeyihiin in si edeb leh iyo xushmayn shaqsinimadooda ah loola dhaqmaan shaqaalaha ama qofka u qabanayo adeega xanaanada guriga ama daryeelka hoy ah ee daryeelka caaafimaadka ee xarunta.

# Daryeel Huffan

Qofka deegaanka ah wuxu xaq u leeyahay daryeel cafimaad oo huffan iyo mid shaqsiyeed oo wanagsan iyaado la tixgelinayo bahida shaqsi ahaneed ee deeganaha. Daryeel huffan micnaheedo waa in daryeelka loo qorsheyay in qofka deegaanka ah gaaro heerkisa ugu sareeyo ee jir ahaan iyo miskax ahaanba ee u ku shaqayn karo. Xuquuqda uma ogolaneyso in qofka/deeganka adeega oo ibiyo qayradka shaqsi ama bulsho.

# Aqoonsiyada Dhaqtarka

Deeganayaasha waa in heystaan ama la siiyo si qoraal ah, magaca, cinwaanka ganacsiga, nambarka telefoonka, iyo takhasuska, haddii ay jiraan, ee Dhakhtarka mas'uulka ka ah isuduwidda daryeelkooda. Mararka ay dhacdo inay daaweeynta talo aheyn, sida uu ku diiwaan galiyayay dhakhtarka xaadirka ah diiwaanka daryeelka deeganka, akhbaarta waa in la siiyaa ilaaliyaha degganaha ama qofka kale ee loo qoondeeyey in uu asaga ama ayada matalo.

# Xiriiryada La socda Adeegyada Kale ee Caafimaad

Deeganayasha helo adeeg bananka ka yimaado waxay xaq oo leyahiin, codsi kadib, in loo sheego magaca adeeg bixiyaha. Deeganayaasha waa in la wargeliya, qoral ahaan, adeeg waliba oo cafimaad oo aay deeganayashan ka helan shaqsi, shirkad, ama hay’ado marka laga reebo guriga. Aqbaaradka waa in iskugu jira magaca adeeg bixiyaha ee bananka ah, cinwaanka iyo

qoral qeexayo adeega noocisa la bixiyaay. Mararka caafimaadka owgi aan deeganaha la wargelin kaarin sida dhaqtarka daryeelayo qoray, aqbaaradka waa in la siyaa deeganaha qofka masuulka ka ah ama qofka lagala xiriir karo ee mataalayo.

# Warbixinta Daryeelka

Deeganayasha ayaa waxaa ay takhaatiirta siin doonaan macluumaad dhamaystiran oo hadda ku saabsan cudurkooda, daaweynta, wixii kale, halista iyo saadaasha ee waajibaadka sharci ee takhtarka uga baaan yahay in uu shaaca ka qaado. Macluumaadkan waxaa ku jiri doonaa shuruudaha iyo luqadda deeganayaasha la filaayo si macquula ay in ay fahmi karaan. Deeganayaasha ayaa waxaa la socon kaara xubin qoyska ah ama wakiil kale ee la doortay, ama labadaba. Macluumaadkaan waa in uu ku jiro waxyaabha khuseeya caafimaadka iyo natiijooyinka weyn oo dhimirka ku saabsan ama wixii kale. Mararka ay dhacdo inay daaweeynta eeyna talo laheeyn, sida uu dhakhtarka xaadirka ah diiwaanka caafimaadka ee degganaha ku qoroy, akhbaarta waa in la siiyaa ilaaliyaha degganah ama qofka kale ee loo qoondeeyey degganaha ah qfka wakiilka ah. Shaqsiyaadka waxay xaq u leeyihiin in ay diidaan macluumaadkan.

Qof kasta oo ka cabanaya nooc kasta oo kansarka naaska waa in si buuxda loogu wargeliyaa, ka hor ama waqtiga gelitaanka iyo inta ay ku jirto, dhammaan hababka kale wax ku ool ah ee daaweynta ee takhtarka daaweynaya u leeyahay aqoon, oo ay ku jirto, qalliin, raajo, ama xanaanada daawada kiimikada, ama isku darka xanaandaha, iyo halista la xiriirta hab kasta.

# Ka Qayb Galka Qorshaha Daryeelka;

Wargelinta Xubnaha Qoyska

1. Deeganaha waa in oo hela xuquuq oo ogaa qayb-qato qorsheynta daryeelkisa cafimaad. Xuquuqdan waxa ka mid ah fursad oo kagala sheekeysto shaqsiyaadka daryeeleyo daweynta iyo qabaabka kale, fursad oo ku codsado wada hadal aan la qorsheyn ee ku adaan daryeelka, iyo xuquuqda oo qoyskisa ama qof sharciyaan mataalo daryeelka ka qayb galin karo, ama laabadaba.
2. Haddii deeganaha so gaalo guri dadka lagu daryeelo ama guriga kalkaalisooyinka u yahay mid mir la'aan ah, wax ogeyn mir la'ii owgeed, ama aan awoodin in u dadka la xiriiro, guriga waa in aay qorshee macquul ah sameyeen iyaago eegayan faqraada 3aad sii aay oo wargeliyaan qoyska qof ka mid ah ama qof loo xilsaray deeganaha in lagala xiriiri karo haddii aay dhacdo xalaad degdega ama la geeyo guryaha dadka lagu daryeelo ama guriga kalkaalisooyinka. Guriga daryeelka ama kalkaalisooyinka waa in u oo ogolaada xubinta qoyska ka socoto in u ka qayb qaato qorshaha daweynta, marka laga reebo in guriga ogyahay in deeganaha dhiibtay dardaran qoral ah kaas oo qilaafsan arinta ama ogyihiin in deeganaha ku codsaday qoral ahaan in qoyskisa ka qayb galin qorsheeynta daryeelkisa. Kadib marka guriga wargeliyo xubinta qoyska ka tirsan balse aaysan oo ogolaan in aay ka qayb galan qorsheynta daryeelka, guriga daryeelka ama kalkaalisooyinka waa in oo sameeya dadal macqul ah, raacsan maariis sharuucda daweynta, si loo ogaado haddii deeganaha oo

qoray dardaran hore oo la xidiido go'aanka caafimaadka ee deeganaha. Haddii aan eegno faqraadan, "dadaal macquul" waxa ka mid ah;

A. Bariis in lagu sameeyo shaqsi ahaan sameynta aay ku yeelanayso deeganaha

B. Bariis in lagu sameeyo aqbaaradka deeganaha ee yaalo guriga daryeelka

C. In la weydiyo haddii aay jiran dad si degdega loola xiriri karo ama xubin ka mid ah qoyskisa haddii la weydin karo in bukaanka dardaraan qortay iyo in deeganaha leeyahay dhaqtar ugar ah uu oo utaago daryeelo; iyo

D. In la weydiyo dhaqtarka qofka deeganaha ah intaa badan oo u aado daryeel caafimaad, haddii aan la aqoon, haddii dhaqtarka oo diwaan galiyaay dardaranka deeganaha. Haddii guriga kalkaalisooyinka ama daryeelka deeganaha oo wargeliyo qoyska qof ka tirsan ama qof deeganaha waakil ka ah ama aay oo ogoladaan in qof qoyskisa ka tirsan qorshahaa daweeynta ka qayb qaato iyagu racaayo leenka hore ee qoralkan, guriga daryeelka kama ahaan masuul deeganaha wixii dhib ee ka soo gaara wargelinta la wargeliyaay qofka qoyskisa ka midka ah ama qofka lagala xirirayay ama ka qayb gelinta daryeelkisa qofka masuulka ka ah haddii aay haboonen ama ku xad-gudub lagu sameyaay aqbaarad shaqsi ahaaned

3. Sameynta daadalka macqulka ah ee in la wargeliyo qofka qoyska ka midka ah ama qofka lagala xiriiro haddii xalaad degdeg jirto ama qofka masuulka ah, guriga waa in aay isku dayaan in aay helan qofka qoyska deeganaha ka midka ah ama qofka masuulka ka ah ee haddii xalaad degdega jirto lagala xiriiro iyago eegayaa shaqsiyan qofka deeganaha siday sameeyn ugu yeelanayso iyo aqbaaradka deeganaha ee yaalo guriga daryeelka. Haddii aay dhacdo in guriga awoodii waayo in oo wargeliyo qoyska deeganaha ama qofka masuulka ka ah ee lala xiriiro mudo 24 sacaadood gudahood ka bilabmaato xiliga la qabilay deeganahoo, guriga daryeelka waa in aay ku wargeliyan hay'ada adeega bulshada ama waxda booliska in deeganee la qabilay guriganaa heli wayaay qof qoyskisa ka mid ah ama masuul lala xiriiro haddii xalaad dedega jirto iskuday kadib. Waxda hay'ada adeega bulshada iyo waxda booliska waa in aay ka caawiyan raadinta iyo wargelinta qoyska deeganaha ama qof masuul ah oo lala xiriiri karo haddii xalaad degdega jirto. Hay'ada adeega bulshada iyo waxda booliska masuul kama ahaan wixii dhib ah ee so gaaro deeganaha ee ku adaan wargelinta qofka qoyskisa kamidka ama masuulka lagala xiriiro la wargeliyaay ama ka qayb gelinta qof qoyskisa kamid ah daryeelkisa in aay aahayd mid aan haboonen ama ku xad-gudub lagu sameyaay aqbaarad shaqsi ahaaned.

# Daryeelka Joogtada Ah

Deeganayasha waxay xaq u leeyihiin in la xanaaneeyo si joogta ah oo macquul ah iyo meeleeyn shaqaale ee socota ilaa inta eey sharuucda xanaanada ama daryeelka hoyga guriga u ogolyahay.

# Xuquuqda Diidmada Daryeelka

Deeganayasha ogaalka leh waxa aay xaq u leeyihiin in aay diidaan daaweynta ku salaysan macluumaadka looga baahan yahay sida u qabo qaybta ku xusan oo cinwaankeedu ahaa "Warbixinta Daryeelka". Deeganayaasha ee diida daweynta, daawo, ama xayiraad cuntada waa in la wargeliyo natiijada oga imman karta caafimaadkooda ama maskaxda ee diidmada, iyada oo lagu qoraayo diiwaanka caafimaadka shakhsiga, hadii ey dhacdo in degganaha uuna awoodi karin inuu fahmo marxaladaha laakiinse aanan lagu xukmin karin, ama marka sharciga uu yareeynayo xaqa inuu diido xanaanada, shuruudaha iyo xaaladaha si buuxda u diiwaan galiyaa dhakhtarka xaadirka ah diiwaanka caafimaadka ee dadka daggeenka ah.

# Tijaabada Cilbi-baaris

Ogolaanshahaaga la wargaliyay oo qoraal ah waa in la helaa ka hor inta uu dagganaha ka qeybgalin cilmi-baarista tijaabada ah. Deeganayaasha waxay xaq u leeyihiin in ay diidaan ka qayb galka. Ogolaanshaha iyo diidmadaba waa in lagu qoro diiwanka daryeelka shaqsiga.

# Siirta Daryeelka

Deeganayaasha waa in ay xaq lahaadaan tixgelin iyo asturnaan taas oo la xiriirta barnaamijka daryeelka caafimaadka shakhsiga. La tashiga keeska, baaritaan, iyo daaweynta waa qarsoodi waana in loo sameeyo si qadarin leh. Asturaanta waa in la dhoowraa waqtiga suuliga, qubeyska, iyo hawlaha kale ee nadaafadda shakhsiga, marka laga reebo sida loogu baahan yahay badbaadada ama gargaar deeganaha.

# Xiifdinta Aqbaaradka

Deeganayaasha waa in loo xaqiijiyo in si qarsodi ah loola dhaqmi doono dinwaanooda shaqsiyadeed iyo caafimaadkooda, oo ey ogolaan karaan ama diidi karaan shaqsi kasta oo ka baxsan guriga xanaanada ama daryeelka hoyga ah. Deeganayaasha ayaa la wargalin doona marka dinwaan shaqsiyadeed uu codsanayo qof kasta oo ka baxsan guriga xanaanada ama daryeelka hoyga ah iyo doorasho laga yaabaa qof inuu raaco marka dinwaanka ama macluumaad ku xiran yihiin ee waraysi gaar ah. Nuqullada xogta macluumaadka qoran ee diiwaanka ayaa laga dhigi doonaa meel laga heli karaa iyada oo la raacayo hoosaadka iyo xeerka diiwaanka Caafimaadka Minnesota, qaybaha 144.291 illaa 144.298. Xuquuqdan ma quseyso baaritaan cabasho iyo u fiirsiga Waaxda Caafimaadka, halkaas oo qandaarsyo bixinta qolo saddexaad yahay, ama meesha Haddii ay kale uu sharcigu dhigayo.

# Shaacinta Adeegyada Laheli Karo

Deeganayaasha waa in loo sheegaa inta ka horeysa iyo inta ey joogaan, adeegyada ku jiro xarunta qarashka ey bixin karaan maalin walba ama Heerka qolka maalin kasta iyo adeegyada kale ee lagu heli karaa qarash dheeraadka ah. Xarumaha waa in sameeyaan dadaal kasta si ay u caawiyaan dadka degaanka in ay helaan warbixin ku saabsan Medicare ama barnaamijka gargaarka caafimaadka in ey bixin doonaan mid ama dhammaan adeegyad aan soo sheegnay.

# Ka Jaawabista Codsiga Adeegyada

Deeganayaasha waxay xaq u leeyihiin in ay jawaab deg-deg ah oo macquul ah laga siiyo su'aalahooda iyo codsiyada.

# Siirta Shaqsiga

Deeganayaasha waxay xaq u leeyihiin in ay tixgelin kasta uu ku saabsan astunaanta, shaqsiyadeed, iyo aqoonsiga dhaqanka oo la xiriira bulshadnimda, diinta, iyonafsi ah fayo-qabka. Shaqaalaha xarunta waa in ey xushmeeyaan asturnaanta qolka degganaha iyaga oo garaacaayo albaabka si looogu ogalaado inta eyna galin, marka laga reebo xaalad daddag ah ama marka ey cadahay in eyna talo aheyn.

# Siirta Wada-Xiriirka

Deeganayaasha ayaa loo ogolaan karaa in si qarsoodi ah dadka eey doortay in ey u galaan iyo la xiriiraan, marka laga reebo sida lagu qeexay Sharciga Ballanqaadka Minnesota, wey ka tagi karaan xarunta sida eey doortaan. Deeganayaasha waa in ey yeeshaan helitaanka, iyagoo kharaska iska bixinaya, si ay u helaan alaabta qoraalka, qalabka xafiisyada, iyo boostada. Boostada goonin u leedahay ayaa lagu diri doonaa iyada oo aan wax faragelin ah lagu sameyn waana in aad heli kartid iyada oon la furin haddii aan caafimaad ahaan laga maarmaan ayna aheyn ama barnaamij ahaan ayna ugu qorin dhakhtar diiwaanka caafimaadka. Waa in uu jiraa helitaanka taleefoonka halkaas oo deeganayaasha ka dhigi karto in ey helaan taleefoonka u soo dhaco kuna hadli karaan si asturan. Xarumaha aanan awooda u laheyn in ey siiyaan meel asturan waa in ey u qabanqaabiyaan si macquul ah wicitaanada dadka degaanka si asturan. Marka laguu ogolaado galitaanka xarun halkaas oo sharciga dowlada uusan ogoleeyn shaacinta macluumaada lagu aqoonsan karo qofka dagganaha ah dadka soo wacaayo ama soo booqanaayo, degganaha, ama mas'uulka sharciga ah ama waliga ee degganaha, waxaa la siin doonaa fursad ay ku shaacin karaan akhbaarta iyada uu joogo dagganaha xarunta dadka soo waca iyo martida laga yaabaa inay la xiriiri rabaan degganaha. Ilaa inta ay suurtagalka tahay, mas'uulka sharciga ah ama waliga degganaha ayaa tixgalin doonaa fikradaha deggannaha ku saabsan shaacinta iyada uu dagganaha uu joogo xarunta. Xaqaan waxa uu ku kooban yahay meesha daaweeynta eeyna talo laheeyn, sida uu dhakhtarka xaadirka ah diiwaanka daryeelka dadka degan ee ku diiwaan galiyay. Sida barnaamij ahaan u xadeeysay qorshaha xarunta ka

hortagga xadgudubka iyada oo raacaysa Qaybtan 626.557, Hoosaadka 14, Sadarka (b), xaqaan waa in sidoo kale waan in loo xadidaa si ku haboon.

# Hantida Shaqsiga

Deeganaha wuxu xaq oo leeyahay in oo haysto dharkiisa iyo hantidisa/alaabtisa xirantahay meesha intaa aay qaadi karto, iyo dabcan haddii aaysan hay'sashada alaabta jabineyn xaquuqda deeganayasha kale, iyo haddii aan caafimaad ahaan ama barnaamij ahaan aan loo isticmaali kaarin sida ku diiwaan gashan caafimaadka, ammaanka, ama sababaha barnaamij la xirirto. Xarunta waa ineey sidoo kale ilaaliyaan meel dhexe oo lagu keeydiyo oo qufulan ama ey siyaan qofka meel wax lagu keydiyo oo u gaar ah oo qufulan oo deeganayaasha ku keydsan karaan waxyaabaha muhimka ah si badbaada ah. Xarunta waa laga yaabaa laakiin loogama baahna in ay bixso magdhow ama beddelaad ah waxyaabaha lumay ama la xaday.

# Adeegyada Laga Sameeyo Guriyaha

Deeganayasha waa in eyna xarunita u qabanin shaqo ama adeegyo haadii eysan ujeeddooyin daweyn ah taaso ku habboon goolka la xiriira diiwaanka caafimaadka shaqsiga.

# Adeeg Bixiyaha La Doorbido

Deeganayaasha ayaa ka iibsan karaan ama ka ijaaraan karaan qalab ama adeegyo aan ka mid aheyn heerka ey maalinlaha ku bixiyaan kana dalban karaan qeybiyaha eey iyaga doortaan haddii aanan si kale sharcigu u dhigin. Adeeg bixiyaha waa in uu xaqiijiyaa in iibsashadaan ku filantahay si ay u daboolaan baahida caafimaad ama daaweynta deeganayaasha.

# Arrimaha Dhaqalaha

Deeganayasha ayaa maareysan kaara arrimaha khuseeya dhaqaalahaooda shaqsiyeed, ama waxaa la siin doonaa ugu yaraan xisaabaadka ah saddexdii biloodba mar macaamiladka dhaqalaha ka wakiilka ah haddii ay u wakiisho masuuliyadda arrintas ayadoo la raacayo sharciyada Minnesota ee khuseeya xarunta wakhti kasta.

# Xaquuqda Wada Xiriiridda

1. Deeganayasha waxaa laga yaabaa la kulmaan eyna helaan martii kana qeyb qaataan hawlaha ganacsi, diinta, siyaasadda, sida ku qeexan qaybta 203B.11 (codeynta Maqnaanshaha) iyo kooxaha bulshada si faragelin la, aan ah ay go'aankeeda haddii wax qabadka uusan fara gelineynin xuquuqda khaaska ah ee dadka kale ee deegganka ah ama ay barnaamij ma ahaan waxba u dhimeynin. Tani waxaa ka mid ah:

A. Xaq u yeelashada inuu ku biiro karo qof kale gudaha ama banaanka xarunta si ey ugu shaqeeyaan hagaajinta daryeelka muddada-dheer;

B. Xaq u yeelashada booqashada qof uu degganaha u magacaabay wakiil daryeel caafimaad sida ku xusan xeerka 145C; iyo

C. Xaq u yeelashada booqashada iyo go'aan qaadashada daryeelka caafimaadka ee shaqsiga u qoondeeyey degganaha laga heli karo cutubka (3).

2. Marka loo ogolaado xarun halkaas oo sharciga fedeeralka uusan ogoleeyn shaacinta qofka deegan macluumaad lagu aqoonsan karo in la siiyo dadka soo wacaayo ama boqdaha, deeganaha, ama qofka masuulka ka ah ama matalo deeganaha, waa in la siiya fursada aay ku ogaladaan shaacinta deeganaha in oo joogo guriga kalkaalisooyinka ama guryaha daryeelka la joogo in loo sheego so wacaaha ama boqdaha doonayo in aay la xiriiran deeganaha. Ilaa intaa aay macqulka tahay, qofka sharciyan masuulka ka ah ama matalaha deeganaha waa in aay tixgeliyan figraddaha deeganaha ee ku aadan shaacinta in deeganaha joogo guriga.

3. Marka loo ogolaado guriga kalkaalisooyinka, deeganaha ama qofka sharciyaan masuulka ka ah ama matalo deeganaha, waxa waajib ah in la siiyo fursad aay ku magacaban qof aay deeganaha waxba isku ahayn oo ka warhaynayo go'aanka deeganaha qofka xidiidka la ah ee ku aadan so boqashada ama go'aan ka gariista caafimaadkiisa. Magacabiistas waa in lagu qora qeybta aqbaaradka caafimaadka ee deeganaha. Marka la tixgelinayo in go'aan caafimaad la gaaro, waa in lagu daara dar-daaran ama magacabiis qof matalo caafimaadka shaqsiyga ee go'aanka garayo marka la eego xeerka 145C ayaa awood ahaan oo ogolaanayo cutubka hoose marka loo tixraaco. Qofka aan xidiidka ahayn waxa laga yaaba in loougu yeero in u yahay qof ka mid ah qoyska deeganaha ama deeganaha.

# Goolaha La Taalinta

Deeganayasha iyo qoyskooda waxay xaq oo leyahiin in aay isku duba-riidin, wadan, kana qeyb-galan goolaha la taalinta deeganayasha iyo goolaha qoysaska. Guri waliba waa in aay bixiyaan goob lagu kulmi karo iyo caawinad ababuulka. Goolaha kulamadooda waa in loo ogolaada siirtooda, shaqalaha iyo so boqdayashaana waa in aay uga qeyb-galan casuumad goolaha bixiyay kaliya. Qof shaqalaha ka mid ah waa in loo xil-sara howshan masuuliyadeeda ah in caawimad la bixiyo kana jaawabo codsiyada qoral ahaanta loo so gudbistay kulanka goolaha kadib. Deeganayasha iyo golaha qoysaska waa in lagu dhiiri-geliya in aay bixiyaan taaloyin ku aadan sharuucda guriga.

# Deeganayasha Isqawo

Deeganayasha, haddii aay isqawan, waa in loo xaqiiya siirtooda marka aay soo boqanayaan nimaankooda/xasaskooda iyo, haddii labada isqawo aay yihin deeganayal guriga kalkaalisooyinka deegan waa in loo ogolaada in aay wadagan qol, marka laga reebo haddii xaalada caafimaad owgeed aay macqul ahayn ama dhaqatiirta masuulka ah aaysan ogoleyn.

# Gudbinta iyo ka Bixinta

Deeganayasha waa in aan la iska gudbin ama bixin ujeed la'aan. Deeganayasha waa in la wargeliya qoral ahaan, qorshaha bixinta ama gudbinta iyo in aay ugu danbeyso 30 malmood intaa aan laga bixin guriga daryeelka/kalkaalisooyinkaiyo ugu yaaran 7da malmood intaa aan laga badalin qolka oo horey deganaha oo degna. Wargelintan waa in aay iskugu jirta xaquuqda oo leyahay deeganaha iyo in u ka horiman karo ficilka la damcay, cinwaanka iyo taleefoonka waxda bariista ee loo yaqan Ombudsman qeyta daryeelka xiliga dheer iyaado la racayo qaynuunka loo yaqan Xeerka Duqowda Mareykanka, qeybtisa 307(a)(12). Deeganaha, oo laga wargeliyaay xaquudan, ayaa ogolaan karo in oo ka badasho meesha ka hore intaa waregelinta mudada dhaaman. Mudada wargelinta waxa laga yaaba in la so gaabiyo haddii aay guriga daryeelka/kalkaalisooyinka xukunka ka baxsan yahay, tusaale ahaan aaragtida kooxda dib u eegista, qabilista deeganayal mar dhaw la aqbalay, isbedel deeganaha daawooyinkisa ama barnaamijka daaweyntisa, daanta deeganaha ama deeganayal kale, qarash bixin la'aan marka laga reebo barnaamijyada karaarka deeganaha aay bixiyan sida ku xusan aqbaaradka deeganaha. Guriga kalkaalisooyinka daryeelka/guryaha daryeelka waa in aay sameyaan dadal macqul ah si aay oo qabilaan deegane cusub iyaago oo aan wax rabsho ku sameyn qolalka la deganyahay.

# Ilaalinta iyo Adeegyada Udoodista

Deeganayasha waa in aay xaq u lahaadan si macqul ah helitaanka xuquuqdooda waqti macquul ah xuquuq walabo oo la heli karo oo ku saabsan ilaalinta adeegyada iyo u doodista si Deeganayasha ah ey u helaan caawimaad ah dhanka isfahamka iyo ilaalinta xuquuqda lagu tilmaamay qeybta Xuquuqdan iyo sharciga kale. Xuquuqdan waa in ey ka mid ahaadan fursadaha ey ku wada xiriiri karaan si qarsoodi ah dagganaha iyo wakiilka ilaalinta adeeegyada xuquuqda iyo adeegyada udoodista.

# Xakameynta

1. Deeganayasha guriga daryeelka kalkaalisooyinka ee wax-fahansanen ee degan guriga daryeelka, qoyska deeganaha ee aan wax-fahansan, sharciyaan qof masuul ka ah ama mataalo deeganaha, iyo kooxda caafimaadkasida ku xusan qeybta 145C.01, ayaa xaq oo leh codsiga iyo ogolaansha in la isticmaalo xakameyn jir ahaan si loo daweeyo xanuunka deeganaha.
2. Marka la helo codsi ah in la xakameeyo jir ahaan deeganaha, guriga daryeelka kalkaalisooyinka waa in aay wargeliyan deeganaha, qoyska deeganaha, iyo sharciyaan qofka mataalo waxa aay yihiin sharuudaha iyo qataraha la xidiido xakameynta jir ahaan. Guriga daryeelka kalkaalisooyinka waa in aay xakameeyan deeganaha kadib marka aay helan qoral ogolaansho saxiixan oo u ogolaanayo in la xakameyn karo deeganaha iyo dalaab ka yimaado dhaqtarka daryeelayo deeganaha dalaabkas oo cadeynayo sababaha loogu bahanyahay xakameynta iyo calaamadaha caafimaadkaee kalifayo.

3. Guriga daryeelka kalkaalisooyinka oo xakameyn sameynayo sida ku xusan sadarka 2aad, waxa waajib ku ah:
   A. Dokuumiinti sharaxayo in la raacay sida ku xusan sadarkas la so sheegay;
   B. In la kormeerayo u isticmaalista xakameynta deeganaha; iyo
   C. Si joogto, iyaado lala tashanaayo deeganaha, qosykisa, iyo dhaqtarka daryeelayo, in dib u eegis lagu sameeyo bahida loo qabo xakameynta.
4. Guriga daryeelka kalkaalisooyinka waa in aaysan qatar ogaalin bixin qarash ganax ah, lacag mag-dhow ah, taas oo aay gabi-ahaanba keentay isticmaalka xakameynta iyaado la racay laana ogolaaday qabka koor ku xusan iyo qeyb hoosedkan. Wax ka mid ah qeyb hoosedkan oo u diidi karo u-koor galaha in oo ficil qaado si oo u difaaco caafimaadkaiyo amniga deeganah, haddii:
   A. Isticmaalka xakameynta aay dhib galineyso caafimaadka iyo amniga deeganaha; iyo
   B. Guriga daryeelka kalkaalisooyinka ku guul dareystay in aay qadan talaabo macqul gal ah si aay u difaacan caafimaadka iyo amniga deeganaha;
5. Ujeedada oo ah qeyb hoosedkan sida ku xusan “calaamado caafimaad” waxa ka mid ah:
   A. In laga walwalo jir amniga jir ahaanta deeganaha; iyo
   B. Baahida jir ahaan iyo miskaaxiyan sida ku oo qeexay deeganaha. Deeganah oo ka cabsaado in u dhaco ayaa noqon karto calaamad caafimaad dhib u keenayso.

   Amar qoran oo ka yimaado deeganaha dhaqtarkisa oo isagu jiro orah iyo ogaanshaha calaamadaha caafimaadka ayaa ku filaan cadeyn ahaan in la sameeyo xakameyn.
6. Marka guriga daryeelka kalkaalisooyinka aay ixtiraaman xeerarka oo yaalo federalka iyo gobolkaba ee ku aadan xakameynta shaqsi jir ahaan, u koor galaha caafimaadka waxa qabanayo orah-da ah in caafimaad ahaan deeganaha oo bahanyahay iyo sababaha sida ku xusan orah-da dalaabka ee dhaqtarka daryeelayay deeganaha qoray. Ujeedkan dalabkan owgi, “calaamado caafimaad” waxa ka mid ah, codsiga deegane wax fahasan, qof ka mid ah qoyskisa oo aan wax fahansaneyn, qof sharciyaan masuul ka ah ama mataalo, iyo kooxda caafimaadka sida ku xusan qeyb hoseedka 145C.01, in guriga sameeyo xakameyn jir si loo hormariyo amniga jir ahaaned ee deeganaha.

# Ka Xor Ahaanshaha ku Xadgudubka

Deeganayasha waa in xor ka ahaadaan xadgudubka sida ku xusan Sharciga ilaalinta dadka waaweeyn "Xadgudubka" micnahiisa dhaqanka tilmaamay qeybta 626.5572, qey-hoosedka 15aad, ama si kas ah iyo gaarsiinta aan dawo la xiriirin ee ah xanuun jireed ama dhaawac, ama koorso kasta oo joogto ah anshaxa loogu tala galay in ay soo saaraan buuqa maskaxda ama dareen. Qof walbo oo daggane ah waa in uu xor ka ahaado kimiko aan daweynta ka xiriirin iyo xanibaad jireed, marka laga reebo xaalad dag dag ah oo diiwaan gashan ama uu ogaalaaday si qoraal ah ka dib baaritaan u sameeyay dhaqtarka dagannaha oo ha xili cayiman oo kooban, iyo

marka kali ah ey noqoto lagamaarmaan in laga ilaaliyo dagganaha in uu gaarsiiyo dhaawac naftiisa ama dhaawac dadka kale.

# Cabashooyinka

Deeganayaasha waa in lagu dhiiri geliyaa oo lagu taageeraa, inta ay sii joogaan xarunta ama inta la daaweynaayo, in ay fahmaan oo ay isticmaalaan xuquuqdooda sida deeganayaasha iyo muwaadiniinta. Deeganayaasha ayaa ka hadli kara cabasho iyo la talin ku saabsan siyaasadaha iyo adeegyada xarunta iyo waxyaabaha kale ee ay doortaan oo ka xor ah xannibaad, faragelin, jaajuub, midabtakoor, ama aarsasho, oo ay ku jirto hanjaabaad ah in la saaro. Ogeysiis ah habka cabashada ee xarunta ama barnaamijka, iyo sidoo kale cinwaanada iyo lambarrada telefoonka Xafiiska Cabashada Caafimaadka Xarunta iyo wakiilka uu qabo sharciga Older Americans ah, qaybta 307(a)(12) waa in lagu dhejiyaa meel la arki karo.

# QEYRAADKA BULSHADA

**(XAAFIISKA DACWOOYINKA GURYAHA CAAFIMAADKA)**
**OFFICE OF HEALTH FACILITY COMPLAINTS**
**PO BOX 64970**
**ST. PAUL, MN 55164-0970**
**(800) 369-7994** ama **(651) 201-4200 (**Metro**)**

**(OMBUDSMAN-KA DARYEELKA WAQTIGA DHEER)**
**OMBUDSMAN FOR LONG-TERM CARE**
PO Box 64971
St. Paul, MN 55164-0971
(800) 657-3591 ama (651) 431-2555 (Metro)

**(WAAXDA CAAFIMAADKA EE MINNESOTA)**
**MINNESOTA DEPARTMENT OF HEALTH**
**(Qeybta Sharciyeenta Caafimaadka)**
**Health Regulation Division**
PO Box 64900
St. Paul, MN 55164-0900
(651) 201-4101

**(MASHRUUCA UDOODISTA CURYAANTA)**
**THE DEVELOPMENTALLY DISABLED ADVOCACY PROJECT**
**(Mashruuca Sharuucda Caafimaadka Dhimirka)**
**The Mental Health Law Project**
430 First Avenue North, Suite 300
Minneapolis, MN 55401-1780
(800) 292-4150 ama (612) 332-1441 (Metro)

**(ADEEGYADA KOOR MEERISTA IYO EEGISTA DAACADNIMADA)**
**SURVEILLANCE & INTEGRITY REVIEW SERVICES**
**(Madhikeydh Qiyaanada & Isticmaalka Xun-Ariimaha Lacag siinta)**
**(Waaxda Adeega Aadanaha ee Minnesota)**
**Minnesota Department of Human Services**
PO Box 64982
St. Paul, MN 55164-0982
(800) 657-3750 ama (651) 431-2650 (Metro)

(Waaxda Caafimaadka ee Minnesota
Shatiga Iyo Shahadooyinka)
Minnesota Department of Health
Licensing and Certification
Boostada 64900, St. Paul, MN 55164
651-201-4101
health.fpc-licensing@state.mn.us
www.health.mn.us

TAARIKHDA: Dhiseembar, 2015

*Si aad u heshid macluumadkan oo luqad kale ku qoran, wac: 651 201-4101*